



University at Buffalo

# Teacher Residency Program

Graduate School of Education

Daryeel Bixiyayaasha qaaliga ah:

Waxaan ahay macalin degane ah oo baranayo shahaadaynta macalinka NYS ee uu bixiyo Barnaamijka Macallinka Deganaha ah ee UB (UB Teacher Residency Program). Buuxinta shuruudaha shahaadaynta iyo barnaamijka ayaa ku qotonto si guul leh u dhammaystirka imtixaanno badan iyo ka qaybqaadashada kormeero taxane ah oo fasalka ah.

Si aan u buuxiyo shuruudahan, waa in aan soo gudbiyaa duubid fiidiyow ah oo muujinayso anigoo fasalka ilmahaaga wax barayo. Diiradda duubistaan waa waxbaridayda iyadoo ujeedka talogalka ay tahay muujinta awoodayda aan ku taageeri karo oo aan ku horumarin karo waxbarashada ardayga. Duubitaanadan waxbaridayda waxa kale oo laga yaabaa inay ka qayb ahaadaan ardayda; si kastaba ha ahaatee, diiradda waxay noqon doontaa waxbariddayda, ma ahaan doonto ardayda fasalka. Inta lagu jiro duubista, ilmahaagu wuxuu ka muuqan karaa fiidiyowga. Magacyada hore ee ardayda ayaa loogu yeeri karaa, laakiin magacyada dambe lama raacin doono.

Marka laga soo tago duubista fiidiyowga, waxaa sidoo kale la iiga baahan karaa in aan soo gudbiyo muunado shaqada ardayga ah si ay u noqoto caddaynta ku dhaqanka waxbariddayda iyo in aan taageero barashada xirfadaysan, qiimeynta cilmi-baarista, carbinta, iyo dib-isu-milicsiga. Tan waxa ku jiri kara qaar ka mid ah shaqada ilmahaaga. Magacyada ardayda gabi ahaanba waa laga saari doonaa haddii shaqadooda lagu daro

Waxa ku jira fiidiyow kasta ama shaqo arday waxa loo isticmaali doonaa oo keliya ujeedada codsigayga shahaadaynta baridda ee NYS iyo sidoo kale ujeedooyin waxbarasho iyo horumarinta barnaamijka ee Jaamacadda Buffalo. Fiidyowyada waxaa lagu kaydin doonaa meel gaar ah oo sugan, oo ah madal waafaqsan FERPA.

Waad ku mahadsan tahay tixgelintaada. Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato Barnaamijka Macallinka Deganaha ah ee UB (UB Teacher Residency Program), fadlan booqo <http://ed.buffalo.edu/residency.html> ama la xiriir [ubtr@buffalo.edu](mailto:ubtr@buffalo.edu).

Daacadnimo,

Macallinka Degganaha ah ee UB: \_\_\_\_\_

Macluumaadka Xiriirka (iimail): \_\_\_\_\_

---

**Fadlan soo celi foomkan halka lagu gaaro \_\_\_\_\_ haddii aad ogolaato duubista fiidiyowyada ilmahaaga AMA u adeegsiga shaqada ardayga ujeedooyinka codsiga shahaadaynta baridda ama ujeedooyinka waxbarasho ee Jaamacadda Buffalo. Haddii aadan soo celin foomkan, duubista fiidiyowga iyo shaqada ardayda waxaa loo gudbin karaa shahaadaynta iyo isticmaalka barnaamijka la xiriira oo keliya.**

- Ma OGGOLI duubista fiidiyowga iyo isticmaalka shaqada ardayga.
- Waan OGGOLAHAY duubista fiidiyowga iyo isticmaalka shaqada ardayga.

Magaca Ardayga: \_\_\_\_\_

Saxiixa Waalidka/Masuulka: \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_